

# Hanaanka Isqorista Portland Public Schools

## Soo ururi macluumaadkan

- Dhukumenti caddeyn u ah da'da (shahaado dhalasho, baasaboora ama dhukumenti lamid ah)
- 2 dhukumenti oo xaqiijin u ah cinwaanka. Tusaalayaasha waxa kamid ah heshiisyada amaahda guryaha, heshiiska kirada, biilasha adeegyada guriga (taas oo ku taariikhaysan 30 ka maalmood ee ugu dambeeya wakhtiga isqorista), caymiska ama bayaanka kaalmada dawladda.
  - Magaca dawladda, cinwaanka guriga iyo taariikhdu waa inay muuqdaan
  - haddii aanad bixin karayn laba caddeymood oo cinwaanka ah, la xidhiidh Xarunta Qorista iyo Gudbinta
- Diiwaanada tallaalka
  - Macluumaadka Shuruudaha Tallaalka ee heerka fasalka waxa laga heli karaa [websaytka Adeega Tallaalka Degmada ee Waxbarashada Multnomah](#)
- Macluumaadka Baadhitaanka Caafimaadka Ilkaha iyo Aragtida (Keliya da'da 7 sano jirka iyo wixii ka yar)
- Macluumaadka xidhiidhka xaaladda degdega ah
- Macluumaadka xidhiidhka dugsigii hore (looma baahna bilawga Xanaanada)
- Waxbarashada gaarka ah (IFSP, IEP) ama qorshaha adeegyada gaarka ah (504), haddii ay habboon tahay

---

## Hanaanka isdiiwaangelinta onlaynka ah

Booqo [www.pps.net/enroll](http://www.pps.net/enroll). Abuur Koontada Isdiiwaangelinta ee Onlaynka ah. Ku lifaaq dukumiintiyada xaqiijinta cinwaanka. Buuxi isdiiwaangelinta onlaynka ah oo guji gudbi. Xoghaynta dugsigu wuxuu la xiriiri doonaa waalidka/mas'uulka sharciga ah ee wax diiwaangalinaya si uu u ururiyo diiwaanka/foomka CIS ee tallaalka una xaqiijiyo caddeynta da'da; sidoo kalena uu u ururiyo wixii macluumaad ah ee maqan ee lagama maarmaanka u ah dhammeystirka hanaanka qorista.

Xusuusin: Isdiiwaangelinta onlaynka ahi waxay ka diiwaangelin doontaa ardayga dugsigu loo qoondeeyay cinwaanka guriga. Si aad u xaqiijiso dugsigu, booqo [www.pps.net/Page/2379](http://www.pps.net/Page/2379) oo ku qor cinwaanka Helaha Dugsiga (School Finder).

## Hanaanka isdiiwaangelinta ee warqadda ah

Buuxi foomamka warqadda ah una gudbi xoghaynta dugsigu ay iyadoo ay la socdaan dhammaan dukumiintiyada loo baahanyahay.

Xirmada isdiiwaangelinta waxaa ku jira:

- Foomka isdiiwaangelinta
- Caddeynta da'da
- 2 caddeymood oo cinwaanka guriga ah
- Diiwaanka tallaalka
- Foomka Baadhista Aragga iyo Ilkaha, haddii ay khuseyso
- Qorshaha IEP ama 504, haddii ay khuseyso